Khayraadka COVID-19 iyo Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee loogu talagalay Soogalootiga iyo Qaxootiga

Waxaan cusboonaysiin doonaa tani markii macluumaad cusub la helo. Haddii aad qabtid su'aalo aan looga jawaabin halkan, fadlan imayl u dir Sophorn.Cheang@oregon.gov.

Afeefo: *Dukumintigani ma ahan talo sharciyeed. Shakhsiyaadka ka walaacsan inay helida macaashka dawlada saameyn karto iyo sida ay u saameyn karto xaaladdooda soogalooti waa inay caawimaad weydiistaan qareen soogalooti.*

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO EE LA-XIRIIRA CAAFIMAADKA IYO COVID-19

Marka la eego amarka fulinta ee Gudoomiyaha (Governor) Oregon, waa maxay waxa hadda la oggol yahay ama waxa aan la oggolayn?
Fadlan tixraac sookoobyada aan horey u turmnay ee Amarka Fulinta 20-12 ee Guri Joogista, Badbaadinta Noolasha (ganacsiyada furan/xiran iyo waxa la oggol yahay ama aan la oggolaan).

Waxaa jira macluumaad aad u badan oo ku saabsan Amarka Fulinta ee 20-12, "Joog Guriga, Badbaadi Nolal," ee halkee baan ka heli karaa xaashiyo, waraaqo sawiro leh ama dukumiinti hal bog ah?
Macluumaadka, Agabyada Baraha Bulshada, iyo shaxanada ku saabsan sida "Guriga loo Joogo, loo Badbaadiyo Nolosha" ayaa hadda websaydkan looga heli karaa luqado kala duwan: https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19.

Haddii aan qabo astaamaha cudurka korona fayraska, maxaan sameeyaa?
Haddii aad xanuunsato aadna qabto astaamaha jirro fudud (qandho, qufac, neefta oo kugu yaraato): Joog guriga. Ka dheeraw dadka kale ee guriga kula jooga. Ku hay qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan guriga si aysan u faafin fayruuska. Xiro maaskarada wajiga. Wac dhakhtarkaaga ama wac 2-1-1 si aad u ogaato in lagaa baarayo COVID-19.
Haddii aad qabtid calaamadaha xaalad degdeg ah (neefsashada oo dhib ah, laab xanuun/cadaadis, jahwareer cusub/hurda ka kicida oo dhib ah, bushimaha ama wajiga oo midab buluug ah yeesho, astaamo kale oo daran): Wac 9-1-1.

Weli ma arki karaa dhakhtar haddii aanan lahayn caymis caafimaad?
Haa. Tani waxaa ku jira daryeelka aad ku hesho qolka gurmadka, xarumaha caafimaad ee bulshada iyo kuwa soogalootiga, rugaha caafimaad ee lacag la'aanta ah, iyo isbitaalada dawlada.

Haddii aan haysto CAWEM, OHP, ama caymis gaar ah, immisa lacag ah ayay igu kacaysaa inaan helo baaritaanka ama daaweynta COVID-19, oo ay kujirto tagista isbitaalka?
Waxba. Guddoomiyaha ayaa heshiis la gashay shirkadaha caymiska si dadka aysan jeebkooda uga bixin wax lacag ah oo loogu talagalay baaritaanada COVID-19 ama isbitaal dhigida uu sababay COVID-19. Faa'iidada Qorshaha Caafimaadka ee Oregon (OHP) ee ah Kharashka Gurmadka Caafimaad ee Laga Tanaasulay oo loogu talagalay Muwaadinka/Shisheeyaha (CAWEM) ayaa waxaa ka mid ah adeegyada gurmadka ee la xiriira cudurka korona fayraska (COVID-19). Tani waxaa ka mid ah ku baarista qolka xaaladaha degdegga ah/gurmadka ee isbitaalka iyo isbitaal dhigida haddii loo baahdo.

Maxaan sameeyaa haddii aanan lahayn caymis caafimaad laakiin aan u baahanahay dhakhtar?
Haddii aadan haysan caymiska caafimaadka Oregon (OHP), waxaad ka codsan kartaa halkan. Haddii aadan rabin inaad iska qorto OHP, waxaad arki kartaa dhakhtar caafimaad adigoo u marayo rugta caafimaadka ee degmadaada ama rug caafimaad oo heer federaal laga aqoonsaday (FQHC). Waxaad heli kartaa liiska rugahan caafimaad ee ku yaalo Oregon adigoo gujinaya halkaan. Qof kasta, iyada oo aan la eegayn xaaladooda soogalooti, ayaa aadi karaa mid ka mid ah rugahan caafimaad. Waxay lahaan doonaan cabbirka kharashaadka adeegyada guud ee daryeelka aasaasiga ah, waxaana la bixin doonaa dhammaan baaritaanada iyo daaweynta la xiriirta COVID-19 iyadoo aysan wax kharash ah kugu fadhin.

Miyaa gurigayga la iga eryi doonaa haddii aanan bixin karin kirada?
Maya. Ilaa 19-ka Juun, 2020, qofna gurigooda lagama saari doono haddii cudurka korona fayraska awgii aysan bixin karin kirada. Fadlan la xiriir milkiilahaaga si aad u ogeysiisid haddii aadan bixin karin lacagta oona samee qorsho. Waxaa wali lagugu lahaan doonaa kirada laakiin mar dambe ayaad bixin kartaa.

Miyaa la iga goyn doonaa adeegyadayda haddii aanan bixin karin lacagta?
Maya. Korontada, gaaska, biyaha, iyo interneetka lama goyn doono haddii aadan bixin karin lacagta oo dakhligaagu kaa lumay cudurka korona fayraska awgii. Fadlan la xiriir shirkada aad isticmaasho si aad u ogeysiisid haddii aadan bixin karin lacagta oona samee qorsho. Waxaa weli lagugu lahaan doonaa lacagta adeegyada aad isticmaashay.

Haddii aan qaato kaalmada cuntada ee SNAP (oo horey loogu yiqiinay foojarada cuntada), miyaan u isticmaali karaa inaan raashiin uga dalbado onlayn?
Dukaamada cuntada ka sokow, dadka qaata SNAP waxay hadda raashiin onlayn uga dalban karaan Amazon ama Walmart. Si aad u ogaatid inaad u-qalantid kaalmada cuntada ee SNAP ee laga helo lacag raashiin lagu iibsado, guji halkan ama wac Oregon SafeNet, 1-800-723-3638.

Miyay keliya dad ka tirsan midabyo qaar qaadi karaan fayruuska?

Maya. Qof kasta ayaa qaadi kara fayruuska, qof kastana ayaa faafin karaa fayruuska. Fayrasyada ma sameeyaan takoorid. Anagana waa inaan sidaa oo kale ahaanaa.

Sideen ku ogaan karaa in macluumaadka aan arkayo ama maqlayo uu sax yahay? Xageen u raadsadaa macluumaad sax ah?

Macluumaadka waa mid la isku halleyn karo haddii uu ka yimaado websaydhka Guddoomiyaha Gobolka ama websaydhka Maamulka Caafimaadka ee Oregon. Ururka Caafimaadka ee Adduunku ayaa sidoo kale leh websayd kala saarayo khuraafaadka/beenta iyo xaqiiqaha ku saabsan COVID-19.

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEDIIYO EE KU SAABSAN SOOGALOOTIGA IYO BAADQABKA DADWEYNAHA

Waxaan ahay qof degan Oregon oo aan sharci lahayn. Miyaa la iga baari karaa COVID-19 ama ma raadsan karaa daaweyn caafimaad oo loogu talagalay COVID-19 anigoo ku caysan kaliya caymiska daryeelka degdegga ah (CAWEM)?
Haa. Maamulka Caafimaadka ee Oregon wuxuu sheegayaa in faa'iidada Qorshaha Caafimaadka ee Oregon (OHP) ee ah Kharashka Gurmadka Caafimaad ee Laga Tanaasulay oo loogu talagalay Muwaadinka/Shisheeyaha (CAWEM) ay ka mid yihiin adeegyada gurmadka ee la xiriira cudurka korona fayraska (COVID-19), sidaa darteed iyadoo bilaash ah ayaa lagaa baari karaa aadna heli kartaa daaweynta la xiriirta COVID-19.

Waxaan ka walaacsanahay inaan noqdo qof qaato macaashka dawlada/dheefaha ay dawlada siisa shisheeyayaasha. Miyay dhib u keensan doontaa qoyskaygu haddii nalaga baaro ama nalaga daweeyo cudurka korona fayraska?
Maya. Haddii aad tahay Degane Joogtada ah oo Sharciyaysan (haysatid kaarka cagaaran) aadna codsanaysid inaad noqoto muwaadin Maraykan ah, USCIS waxay websaydkeeda ku soo saartay digniin sheegayso in baarista, daawaynta, ama daryeelka kahortagga (oo ay ku jiraan tallaalada, haddii tallaal la helo) ee la xiriira COVID-19 aysan u tixgelin doonin qayb ka tirsan go'aaminta qof qaata macaashka dawlada. Haddii aad qabtid astaamo u eg kuwa cudurka Korona Fayraska/COVID-19 (qandho, qufac, neefta oo yaraato), waa inaad heshaa daaweyn caafimaad. Tani qayb kama noqon doonto falanqaynta Noqoshada Qof Qaata Macaashka Dawlada taasi oo si xun kuu saameyn karta mustaqbalka.

- Macluumaad ku saabsan Qofka Qaata Macaashka Dawlada iyo COVID-19 oo ka socda Kooxda Ilaalinta Qoysaska Soogalootiga ah: https://docs.google.com/document/d/1fQyxwXnXqGD4wxMNj4xMsJ4_1aOschcbK0yxliN4k9w/edit
- Macluumaad ku saabsan Qofka Qaata Macaashka Dawlada iyo COVID-19 oo ka socda Dowladda Federaalka: https://www.uscis.gov/greencard/public-charge
- Macluumaad ka socda Maamulka Caafimaadka ee Oregon oo ku Saabsan Qofka Qaata Macaashka Dawlada: https://www.oregon.gov/oha/PH/DISEASESCONDITIONS/DISEASESAZ/Pages/COVID19-FAQ.aspx
- Xaashida Xaqiiqaha iyo Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee ku saabsan Sharciga Cusub ee Dawlada Federaalka ee "Qofka Qaata Macaashka Dawlada": https://www.oregon.gov/OHA/ERD/Pages/public-charge.aspx

Miyay ICE joogi doonaan xarumaha caafimaadka mana la wadaagi doonaa macluumaadkayga caafimaad?

Haddii aad qabtid xaalad caafimaad oo degdeg ah ama aad u baahan tahay daryeel caafimaad, waa inaad daryeel raadsato. Waaxda Amniga Gudaha ayaa u aqoonsantay goobaha caafimaadka inay yihiin goobo xasaasi ah. Tilmaamaha federaalka ayaa ka mamnuucaya wakiilada soogalootiga inay ku fuliyaan xirista ama talaabooyinka kale ee sharci fulinta ah xarumaha daryeelka caafimaadka, sida isbitaalada, xafiisyada dhakhaatiirta, rugaha caafimaadka, iyo xarumaha daryeelka degdega ah. Macluumaadkaaga caafimaad waxaa keliya wadaagayo adiga iyo dhakhtarkaaga waxaana lagu ilaaliya xeerarka asturnaanta ee HIPPA.

Miyay booliisku i istaajin doonaan haddii aan aadayo shaqada ama dukaanka raashiinka?

Uma baahnid waraaqo qaas ah oo uu ku siiyo maamulahaaga, calaamad aad ku dhejiso baabuurkaaga, ama ogolaansho kale si shaqada ama ganacsiyada furan, sida dukaanka raashinka, farmashiyaha, ama bakhaarka qalabka aad baabuur ugu aado, ugu lugayso ama ugu qaadatid gaadiidka dadweynaha. Waxaad ka akhrisan kartaa jawaaba dheeri ah oo ka socda booliiska Gobolka Oregon halkan.

Miyay Ilaalada Qaranka ama ciidanku la wareegayaan xilka?

Maya. Ilaalada Qaranka waxay xarumo caafimaad ka dhisayaan Salem, Oregon, taasi ayayna diirada saarayaan waqtigan.

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO EE SHAQAYNTA IYO GOOBTA SHAQADA

Ma la ii oggol yahay inaan aado shaqada?

Haa. Haddii loo-shaqeeyahaagu furan yahay uuna u hoggaansamayo awaamirta kala fogaanshaha dadka, haa, waad aadi kartaa shaqada. Loo-shaqeeyuhu waa inuu xaqiijiyaa inaad 6 fuud ka fogaan kartid dadka kale.

Maxaa dhacaya haddii shaqadaydu ay furan tahay, laakiin aysan dadka kala fogayn 6 fuud?

Waxaad u soo sheegi kartaa qaybta Baadqabka Shaqada iyo Caafimaadka ee Oregon adigoo gujinaya halkan. Su'aasha ah, "ka dhig aqoonsigaaga qarsoodi," dooro "haa" markaa magacaaga iyo waxa aad sheegtay lama siin doono loo-shaqeeyahaaga.

Ma inaan tagaa shaqada haddii aan xanuunsanahay?

Haddii aad xannuun dareento, fadlan joog guriga oo qof kasta oo gurigaaga ka mid ah sidoo kale ha joogo guriga si iidan u faafin fayruuska. Dadka kale ee jooga gurigaaga ayaa sidoo kale u baahan inay joogaan guriga muddo 14 maalmood ah maxaa yeelay waxay faafi karaan cudurka ka hor inta aysan isku arkin astaamaha cudurka.

Miyaa weli la iga rabaa inaan bixiyo canshuurahaydu 15-ka bisha Abriil?
Maya. Canshuuraha Dowlada Federaalka (IRS) iyo kuwa gobolka Oregon waxaa hada la rabaa in la bixiyo 15-ka Luulyo.

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO EE TIRAKOOBKA 2020

Haddii aan ka jawaabo Tirakoobka, miyay dhibaato iiga imaan kartaa ICE ama booliska?
Maya. Wax dhib ah kaagama imaanayo wixii aad ku sheegtid foomka tirakoobka. Fadlan buuxi foomka Tirakoobka. Tirakoobka 2020 ayaa hadda la heli karaa waxaana onlaym looga buuxin karaa 13 luqadood oo kala duwan iyadoo la booqanayo my2020Census.gov, ama la wacayo taleefan lambarka 844-330-2020. Waxaad sidoo kale ku heli kartaa luqaddaada adigoo gujinaya halkan.

Jawaabahayga aan ka bixiyay su'aalaha tirakoobka ma yihiin kuwo qarsoodi ah?
Xafiiska Tirakoobka Maraykanka wuxuu si dhab ah u qaataa mas'uuliyadooda ay ku ilaalinayaan macluumaadkaaga. Sharcigu wuxuu dejiyay tallaabooyin aad u adag si loo ilaaliyo macluumaadkaaga. Xafiiska Tirakoobka looma ogola inuu jawaabahaaga ugu siideeyo dadweynaha qaab lagugu aqoonsan karo adiga ama lagu aqoonsan karo qoyskaaga. Sharci ahaan, Xafiiska Tirakoobka wuxuu kaliya u adeegsan kara jawaabahaaga soo-saarista xissabaha tirakoobka. Macluumaadkaaga ayaa sidoo kale ka ilaashan halisyada interneetka iyadoo baaritaan lagu sameeynayo nidaamyada gudbinaya xogtaada. Dhammaan macluumaadka lagu soo gudbiyo Websaydka ayaa qarsoodi laga dhigay si loo ilaaliyo asturnaantaada. Ciqaabta shaacinta sharci darada ah waa ganaax gaaraya $250,000 ama xabsi illaa shan sano ah, ama labadaba. Wixii ah macluumaad dheeri ah oo ku saabsan asturnaanta iyo qarsoodiga, eeg warqada xaqiiqaha ee Xafiiska Tirakoobka Mareykanka ee khuseeysa mawduucan.

COVID-19 awgii, miyaa waqtiga Tirakoobka dib loo dhigi doonaa?
Dilaaca cudurka COVID-19 awgii, Xafiiska Tirakoobka Maraykanka ayaa wax ka beddelay Howlgallada Tirakoobka 2020. Marxalada jawaabaha shakhsiyeed ayaa laga beddelay Maarso 12 - Luulyo 31 loona beddelay Maarso 12 - Agoosto 14, 2020. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan beddelaadyada hawlgallada ayaa laga heli karaa HALKAN.

KHAYRAADYADA KALE EE COVID-19

MACLUUMAADKA GUUD:
Wixii su'aalo ah ama si aad u raadsato khayraadyada aad heli karto, wac 2-1-1 ama booqo https://www.211info.org/

Bogga websaydka COVID-19 ee Guddoomiye Kate Brown: http://coronavirus.oregon.gov/
Warbixinada Maamulka Caafimaadka Oregon ee ugu dambeeyay ee ku saabsan COVID-19: https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19
Su'aalaha ku saabsan COVID-19 ee Badanaa la Isweydiiyo ee Maamulka Caafimaadka Oregon: https://www.oregon.gov/oha/PH/DISEASESCONDITIONS/DISEASESAZ/Pages/COVID19-FAQ.aspx?wp1284=l:100

SHAQADA:

- Sharciga Oregon wuxuu uga baahanyahay loo-shaqeeyayaasha inay ku siiyaan fasax jirro. Waa in lagu siiyo lacagta wakhtiga aad jiran tahay haddii loo-shaqeeyahaagu leeyahay 10 shaqaale ama ka badan (6 ama ka badan haddii ganacsigu ku yaalo Portland). Waxaad helaysaa ugu yaraan 1 saac oo fasax xanuun ah 30-kii saacadood ee aad shaqeysaba. Waxaad isticmaali kartaa fasaxa jirada haddii aad jiran tahay, si aad u daryeesho xubin qoyska ka mid ah oo jiran, haddii aad u baahan tahay inaad aado dhakhtarka, ama waxaad u adeegsan kartaa inaad daryeesho ilmahaagu haddii dugsiga ilmahaagu xiran yahay. Guji halkan si aad wax dheeri ah u ogaatid. Haddii loo-shaqeeyahaagu uusan raacayn xeerkan, waxaad wici kartaa: 971-673-0761 ama imayl u dir: mailb@boli.state.or.us
- Haddii aad shaqadaada weyday, guji halkan si aad u hehid codsiga shaqo la'aanta.
- Guji halkan si aad u soo sheegtid haddii loo-shaqeeyahaagu la raba inuu xira ganacsiga laakin uusan xirin ama haddii uusan kuu oggolaanayn inaad ka joogto 6 fuud dadka kale. (Su'aasha ah, "ka dhig aqoonsigaaga qarsoodi," dooro "haa" markaa magacaaga iyo waxa aad sheegtay lama siin doono loo-shaqeeyahaaga.

- Halkan guji haddii aad qabtid su'aalo kale oo shaqo oo ku saabsan shaqo ka joojinta ganacsi, xiritaanada, iyo faa’iidooyinka caymiska shaqo la'aanta ee la xiriira COVID-19.

CAYMISKA CAAFIMAAD/DARYEELKA CAAFIMAAD:

Codso caymiska caafimaad ee bilaashka ah adigoo u marayo Cover All Kids ama codso Qorshaha Caafimaad ee Oregon adigoo gujinaya halkan (ka dibna hoos u dhaadhac si aad u aragto luqadaha kala duwan).

BARNAAMIJYADA KAALMADA CUNTADA IYO NAFAQADA:

- Dugsiyada ayaa wali bixinaya quraac iyo qado inta ay dugsiyada xiran yihiin. Halkan guji si aad u heshid liiska degmo dugdisyeedyada ka dibna guji magaca degmo dugsiyeedkaaga si aad u ogaatid meesha aad cuntada ka qaadanayso iyo goorta aad qaadanayso.
- U adeegso Baaraha Cunto Kaydiayaha Oregon inaad ku raadsatid meelaha cuntada lagu kaydiyo iyo goobaha kaalmada cuntada ee gobolka oo dhan.

- Codso kaalmooyinka SNAP (oo horey loogu yiqiinay foojarada cuntada) si aad u heshid lacag aad raashiin ku iibsato, adigoo gujinaya halkan ama ka wacayo Oregon SafeNet lambarka 1-800-723-3638.
- Haddii aad uur leedahay, naas nuujinayso, ama aad qabtid cunug ka yar 5 sano jir, waxaad u-qalmi kartaa lacagta lagu iibsado raashiinka ee Haweenka, Dhallaanka, iyo Caruurta (WIC). Ka codsado halkan ama wac 2-1-1 si aad u codsato.

KA FOGAANSHAHA XADGUDUBKA:
Waxaan ogsoonahay inay hadda jiraan halisyo baadqab oo kordhay. Si aad uga jawaabtoo sida aad baadqab u noqon karta, waxay ku xiran tahay xaaladaada. Adigoo kula hadlaya taleefanka ayaa u-doode uu kaa caawin kara inaad sameysato qorshe baadqab oo shaqsiyeed adigoo jooga gurigaaga. Halkan waxaa ah websayd aad ka heli karto u-doode, haddii ay baadqab tahay inaad booqato websaydkan: https://www.ocadsv.org/find-help

Waxaad sidoo kale wici kartaa khadka tooska ah ee qaranka: 1-800-799-7233

Halkan waxaa ah websayd leh khayraadyo dheeri ah, oo ay ku jiraan kaalmo maaliyadeed: https://www.oregon.gov/DHS/ABUSE/DOMESTIC/Pages/index.aspx

Haddii laguugu xadgudbo adigoo jooga guriga, wac Khadka Dhibaatada Rabshada Guriga ee 888-235-5333 ama qoraalka CONNECT ku dir 741741.

HELIDA DARYEELKA CARUURTA EE DEGDEGA AH:
Haddii ay tahay inaad xaadirto shaqada (dibedda gurigaaga) inta lagu jiro xaaladdan degdegga ah oo aadan haysan qof kuu ilaaliya canuggaaga, guji halkan ama wac 2-1-1 si aad u hesho Daryeelka Ilmaha ee Degdega ah ee Oregon.

MACLUUMAADKA KU SAABSAN XEERKA QOFKA QAATA MACAASHKA DAWLADA:
Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sharciga qofka qaata macaashka dawlada, oo ay ku jiraan agabyo la tarjumay, ayaa laga heli karaa websaydyada Maamulka Caafimaadka ee Oregon iyo Waaxda Adeegyada Aadanaha.. Kuwa ka welwelsan sida noqoshada qof qaata macaashka dawlada ay saameyn ugu yeelan karto waxay sidoo kale wici karaan Khadka Tooska ah ee Faa'iidooyinka Dadweynaha ee Oregon iyagoo isticmaalaya lambarka 1-800-520-5292 ama waxay qareenka soogalootiga ka heli karaan oregonimmigrationresource.org.

JOOJI CUNSURIYADA LA XIRIRRTA CUDURKA KORONA FAYRASKA IYO KHAYRAADYADA KALE

- Baro sida "Loo Faafiyo Xaqiiqaha, Beddelkii Cabsida"

- U soo sheeg wixii ah dembi eexasho/cunsurinimo Waaxda Cadaaladda ee Oregon adigoo gujinaya halkan
- Wax badan ka baro Portland United Against Hate (Midowga Portland ee Kahortagga Naceebka)